# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### Kal-fadhigii 41aad Fadhigii 23aad

**Salaasa 26 – Nov - 2019**

**Quraanka: -** Md. Obsiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe M. Faarax

Ajandaha Fadhiga:- Doodda odoraska Miisaanidaya Qoranka ee 2020

**Md. Cabdilaahi Xuseen Cige (Balaaki)** **(13min 17sec):-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada, Saxaafada iyo martidaba waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka ASC, salaam ka dib, Gudoomiye waxa ina horyaala Miisaaniyadii Qaranka 2020ka oo ah Miisaaniyad balaadhan, Qodobka 53aad ee Dastuurku wuxuu sheegayaa in marka Miisaaniyada Golaha loo soo gudbiyo uu ka dooddo, sida darteed, waxaan soo jeedinayaa taladayda Miisaaniyada ku haboon oo kala ah:-

1. **Shaxda Dakhliga Miisaaniyada 2010 shaxdiisa 12aad ee bayjka 13** oo ku qoran tahay isugeynta Cashuuraha cusub, Gudoomiye halkaasi ma faahfaahsana oo lacag 22 bilyan lagu sheegay baa waxay ka soo hoyanaysaa cashuuraha cusub baa ku qoran, umadana hadaynu wax u sharciyaynayno waxa fiican si aan muran iyo mugdi hadhaw u galin in la cadeeyo cashuurta cusub ee umada la saarayaa maxay tahay, Miisaaniyadana lagu cadeeyo si aanay hadhaw u noqon cashuur kale oo cusub oo Golaha idinka cashuur cusub sharci-gareeyay hadhaw loo odhan, **waxaan soo jeedinayaa in Cadeeyo Cashuurtaas Cusub waxay tahay si aanay u dhicin sidii hore u dhacday.**
2. Gudoomiye Waxa la abuuray ama la sameeyay Asxaabta siyaasada Qaranka sanadkii 2001dii, waxa Miisaaniyadihii wakhtiyadaas loogu daray lacag si ay kobcaan xisbiyadu, Miisaaniyadahaasi way kobceen lacagtii baa korodhay, laakiin asxaabteenii may kordhin, may balaadhan oo waxay noqdeen fadhiid miisaaniyada kabka laga siiyaa xisbgiiba uu nin kaliya ahi yeeshay, waxay noqdeen lacagta Miisaaniyada laga siiyo shaqaale isaga meesha u jooga, halkii xisbiyadu ka kobci lahaayeen, halkii xisbiyadu ka balaadhan lahaayeen oo noqon lahaayeen xisbigu mid lawada yeesho. Iyadoo Miisaaniyada ay ugu jirto madax xigaha 26404408 ee beyj 36 Miisaaniyad dhan 6,552,000,000 (lix bilyan, shan boqol laba iyo konton miliyan oo Sl Sh/=) oo xisbi waliba qaato 2,184,000,000 (laba

bilyan, boqol afar iyo sideetan miliyan oo Sl Sh/=) sanadkii, bishii waxay qaataan xisbi kasta boqol laba iyo sideetan milyan oo u dhiganta $21 kun oo dollar, taasi waxay keentay in xisbi waliba yeesho dad uu mushaharsiiyo oo xafiisyadooda fadhiya.

**Waxaan soo jeedinaya** in Miisaaniyada intaas le'eg laga jaro shan bilyan oo ka mid ah loona gooyo oo la siiyo Cusbitaalada dalka oo u baahan lacagtaas, cisbitaalada dalka inta lacagtaas loo gooyo kuwaas oo kala ah Cusbitaalada Hargeysa, Burco, Boorama, Ceergaabo, Laascaanood, Berbera, Oodweyne, Baligubadle, Gabiley, Caynabo, Sheekh, Ceel-afweyn iyo Saylac.

3. **Madax-xigaha (sub-head) 2211348 Miisaaniyada Wasaarada Arrimaha Dibada ee Sanduuqa aqoonsi raadinta Somaliland** waxa ku jirtay 15 bilyan, waxaana sanadkan laga dhigay 25 bilyan, waad garan kartaa in waxaynu u baahan tahay oo mashruuc balaadhan yahay oo qaranku u baahan yahay, sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in Madax-xigahaas aan lagu dayn oo kaliya Wasaarada Arrimaha Dibada, Golayaasha Baarlamaanku waxay ka mid yihiin hay'addaha u xilsaaan ee waliba masuuliyad badani ka saaran tahay inay ka qayb-qaatаan ictiraaf raadinta, suurgalna maaha in Xubno Baarlamaanka ka mid ah oo ka qayb-galaya ama tagaya Shirar Somaliland aqoonsi loogu raadinayo ama ka qayb-galkoodu muhiim u tahay aqoonsiga in mar walba wax loo waydiiyo Hay'addaha ama Dawlada.

   **Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in Madx-xigahaas laga jaro lacag 3 bilyan ah laguna daro qoondada Baarlamaanka ee Guurtida iyo Wakiilada si ay uga qayb-qaataan aqoonsiga heer caalami**

4. **Madax-xigaha (sub-head) 240221 ee Doorashooyinka waxa ku jira 28 bilyan,** waynu ognahayo doorashooyinkii dib bay u dhaceen, labadii sano ee hore lacagtii loo qoondeeyay way u taalaa, laba sano ee soo socdana jaanis baa loo haysta aynu doorashooyinka dhaqaale ugu ururino.

   **Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in 28 bilyan, 14 bilyan oo ka mid ah loogu talagalo (allocated) cusbitaalada ciidamada qaranka iyo 10 bilyan in la siiyo ardayda Ciidamada Qaranku dhalaan, waayo waynu ognahay oo jaamacadihii qaranku iyago hanti dawladeed ku jira ay lacag qaaliya ka qaadaan ardayda, ardayguna marku dugsiga sare ka baxo wuxu halka ku dhaafa oo ku ilaawa jaamacadii inuu sii wato, sidaa darteed, ardayda ciidamadu dhaleen jaamacadaha waxbarasho loogu siiyo.**

**Md. Axmed Barkhad Obsiiye** **(6min 02sec):-** Shir-gudoonka iyo Mudanyaasha waan idin salaamayaa, horta waxaan aad uga xumahay waxaan soo ilaaway saaka wixii aan diyaarsaday, laakiin xooga baan dusha ka marayaa, anigu waxaan xooga saaray oo eegay

buuga labaad ee volume 2 oo ah Miisaaniyada hay'addaha madaxa-banaan iyo dawladaha hoose.

Markaad eegto Miisaaniyadaas Hay'addaha Madaxa-banaan iyo Dawladaha hoose waxaad ku arkaysaa Wakaalada Dekadaha inay soo qoreen dakhliga maraakiibta iyo meelo kale, wax break down ah malaha oo lama sii kala jajabin meelahaas kalena ma cada oo ma sheegin, taasina waa khalad oo waa inay jajabiyaan oo sheegaan meelkasta.

Kharashaadka markaad eegto meelaha qaar waxaad arkaysaa in kharashaadkii sii laba laabmeen ama saddex laabmeen, waa in dhigaal la sameeyo maaha in kharash aan la garanayn hadba la kordhiyo. Tan kale hay'adaha madax-banaan markaad eegto waxay soo qoreen oo taxeen line kharashku waa intaa headkasina waa intaa, ismay bar-bardhigin wixii baxay sanadkii hore wixii soo kordhay, taasina maaha wax macquul ah oo la qaadan karo, waa la sameeyo break down oo ay jajabiyaan mid kasta. Tusaale Bangiga dhexe wuxuu inoo soo dhigeen kharashka sanadka dambe ay ugu tala-galeen, Wakaaladaha Biyaha sidoo kale waxay soo dhigeen kharashka sanadka dambe la gali doono kii hore siduu ahaa iyo siday u kala kharashgareeyeen midna may sheegin.

Marka anigu waxaan leeyahay buugaa Miisaaniyadaha Hay'adaha madax-banaan dhamaantii sidiisa in loo celiyo oo aan la raacin Miisaaniyada dawlada dhexe oo aan lala ansixin, sidoo kale waa in la yidhaahdaa isa soo saxa oo meelahaas soo sax oo soo hagaajiya oo soo cadeeya.

Sidoo kale Waxa jirta Wasaarada Duulista Hawada, maxaa geeyay hay'adaha madaxa-banaan Wasaarada duulista, teeda kale lama keenin hay'adda wadooyinka laguma so darin hay'addaha madaxa-banaan.

**Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa** in Buugaas Miisaaniyada Hay'addaha Madaxa-banaan sidiisa loo celiyo oo ay soo saxaan.

Sidoo kale isugeyntu waa in aanay khaldamin, wasaaradu waa hay'adii xisaabaadka dalka ugu sareysay, bal waxaad eegta isugeynta Miisaaniyada dawlada dhexe waxba ka khaldan haba yaraato waxa khalad ku jirtaaye. Teedda kale Miisaaniyada Dawlada dhexe markaan eegay Gobolada Awdal iyo Salal wax alaale wax ugu jira ma jiro, xata dekedihiisii waa dunsan yihiin oo dekadii saylac ma jirto, maaha in sanad walba dib loo dhigo, waa in Gobolada wax loogu daraa hadii kale ma ansaxayso.

**Md. Cabdiqaadir Jaamac Xaamud** **(3min 20sec):-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Saxaafada iyo martida sharaftaba Asc, runtii Miisaaniyada Gudiddu si fiican bay u soo shaqeeyeen oo Wasaarada way la soo shaqeeyeen sidaan ognahay, laakiin waxaan la yaabanahay Guddidu waxay Gobolka Sanaag u tagi wayday, waayo mar walba inaynu halka taagnaano waa laga fiican yahay, kastamada gobolkaas inay soo eegaan bay ahayd iyagana sanadkan iyo sanadkii horeba may tagin, waxay ahayd inay kastamada tagaan

oo soo qiimeeyaan dekadaha miisaaniyada loogu daray sida dekada maydh oo ay ahayd inay wax ka soo degaan si ay u soo qiimeeyaan.

Qodobka kale, Ciidamada kolay cabasho badan baa ka jirta, waynuna ognahay dhaqaalohooda marka gobolada bariga la geeyo waxoodii waxba u noqon maayaan iyaga iyo qoyskoodii, marka sida Xildhibaan C/laahi sheegay in wax loo farsameeyo oo meelahaas laga caawiyo waan taageersanahay. Wasaarada Beeraha iyana wax loo kordhiyo si wax soo saara u sameeyaan oo beerista u caawiyaan waa muhiim.

Cusbitaalada guud ee dalka in la kobciyo oo xaaladooda loo kuurgalo waa muhiim, wayo dad aan lacagta iska bixin karrin oo masaakiina baa jira, dadkaasna in la caawiyo waa loo baahan yahay inagaana xil inaga saaran yahay. Runtii miisaaniyada meelo badan baa wax ku soo darsoomay, meelahaasi waxay ahayd in meelaha baahideenu taalo in xooga la saaro, runtii doorkan macalimiinta si fiican baa la sameeyay oo macalimiin badan baa ku jirta, macalimiintu waa kuwii iftiinka dalka soo saarayay, in wax loo farsameeyona waa muhiim.

Marka sida **Qodobka 53aad Farqadihiisa 1aad iyo 2aad** sheegayo Miisaaniyada Goluhu wax waa ka badali karaa, marka in wasaaradahaas wax soo saarka leh sida beeraha dib loo qiimeeyo oo wax loo habeeyo.

**Waxaan soo jeedinayaa** Intaas marka la habeeyo in la sii daayo Miisaaniyada oo la ansixiyo, waad-mahadsan tihiin.

**Md. Faarax Maxamuud Cabdule** **(13min 13sec):-** Mudane Gudoomiye horta Gudiddu Dhaqaaluhu warbixintooda ay inoo keentay wax alaale waxay ka dawo tahay ma jirto, waxayna u hadleen sidii inay yihiin Wasiirka Wasaarada Maaliyada, waxa ay soo qoreena anigu waxba kama soo qaadino tala soo jeedintii ay soo jeedin jireena maanta ma soo jeedin ee way ka xumaatay, waxaad tihiin Guddidii uga wakiilka ahayd Golahan dhaqaalaha, hal qodob baa ku jira waxay soo jeediyeen oo ah in Baarlamaanku ka qayb-qaato ictiraaf raadinta oo dhaqaale loogu daro, wax kale oo ay soo jeediyeen ma jirto.

Gudoomiye, anigu Miisaaniyadan markii aan eegay mashaariicda horumarinta ee la hirgalinayo sanadka 2020ka way badan yihiin aadna muhiim bay u yihiin, laakiin waxa meesha ku jirta sanad walba waxba la kordhiyaaye maxaa loo raacay marka la qorshaynayo ee la leeyahay halkaas waxaas baa laga fulinayaa, waxa weeye anigu waxan u arka in marka miisaaniyada la sameynayo ay wax badan ka dhiman yihiin, waxa loo baahan yahay sida mashaariicda meeluhu ugu kala mudan yihiin laguma salayn, mashaariicda tusaale ahaan qaar waxa la yidhi meel hebla mashruucaas baa laga fulinayaa, qaarna waa la duudubay oo waxa la yidhi intaas oo dhaam baa la qodayaa ama intaas oo MCH baa la dhisayaa, meelahaas in la cadeeyo ayaan Guddidda dhaqaalaha ku dhaliilayaa oo la cadeeyo mashruuc kasta halka laga hirgalinayo, marka taas waxaan soo jeedinayaa in la cadeeyo sida qaar loo cadeeyay oo aan la duudubin.

Waxa kale oo aan Dawlada gaar ahaan Wasaarada Maaliyada u soo jeedinayaa marka dalka Miisaaniyad la sameynayo mashaariicda lagu soo darayo marka hore dalka kormeer lagu sameeyaa oo la ogaada baahiyaha, hadii aan kormer lagu samayn waxay noqonaysaa in inta fadhida qaybsato ama dhulkay yaqaaniin ama soo mareen u dajiyaan, intii kale meeday, waxaan qaba in dalka la soo wada maro, cadaalada daro ayaa ka jirta, dalku wuu kala mudan yahay, waa lakala hormaray. War inagu dalka aynu u warhayno ilayn waynu u dhaaranaye sidii dalku u kala mudan yahay ee u kala horeeyo aynu u soo jeedino ee yaan mid kasta halkii yarayd uu ka yimi, wasiirku halku garanayo wax siinin, waxbaan ka tirsanaynaa, waxaan soo jeedinayaa in dalka kormeer lagu sameeyo dhamaantiisa marka hore si la isula fahmo Wasaarad walba waxay soo qoratay iyo Mashaariicda la fulinayo.

Mashaariicda Miisaaniayda ku jirta waxa ka mid ah Mashruuca sahminta macdanta, aad iyo aad buu muhiim u yahay, lacagta loo qoondeeyayna way yar tahay, marka waxaan leeyahay mashruucan sahminta macdanta in lacag inta ka badan loo qoondeeyo oo mashruuc muhiime ahmiyad la siiyo, sababto ah, dee macdantii waynu u baahanahay, dhaqaalaynu u baahanahay, wadankeeniina wuu buuxaa, hadana dee Chine iska guranaya, wuxuu gurtona war uma hayno, marka waa in la ogaada waxay gurnayaan, oo aqoon u yeelanaa dalkeena waxa ku jira.

Halkan waxa ku qoran oo Guddiddu soo jeedisay in Ururka Naafada loogu daro taakulo, dee kuwa kale oo iyana magac sheeganaya halkanay shalay inoogu yimaadeen, anigu ma diidani in loogu daro naafada oo wax la siinayo, laakiin waxaan leeyahay ha loo qaybiyo oo wixii dawladu urur u aqoonsatay gobolkay doonaan ha joogeene hawada yeeshaan wixii miisaaniyada loogu daray, laakiin yaan la siinin gobol kaliya, ama urur kaliya ee wixii dawladu urur aqoonsatayba la siiyaa.

Sidoo kale waxa ku jira Xidigaha Geeska, taasna waxa weeye dee ururada ay Xukuumadu suugaanada u aqoonsatay hadii iyana wax laga caawinayo waa in lawada siiyo ee aan halka Miisaaniyada loogu kala eexan ee wax kasta Dawladu urur suugaaneed u aqoonsatayba hadii wax la siinayo waa in la wada siiyo, sidoo kale Sooyaal Mujaahidiinta taasna dee in la wada siyo laba mujaahid oo soo wada dagaalamay, soo wada dhaawacmay oo laga yaabo inay maskaxdooduba fahooybayn baa midna qaadanayaa, midna aanu qaadanayn, taasna waxaan leeyahay ha loo cadaalad sameeyo.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa, Guddidduna soo jeedisay oo ah qodobka kaliya ee ay soo jeediyeen, Golayaashu xaq bay u leeyihiin dhaqaalaha loo qoondeeyay aqoonsiga, dhaqaaluhuna kuma filna, inay aduunka maraan oo ictiraafka ka shaqeeyaan oo Baarlamaanada la kulmaan xaq bay u leeyihiin, wax wayna way ka tarayaan baa qabaa, sidaa darteed, waan ku raacsanahay soo jeedinta Guddidda qodobkaas. Ugu dambeyn waxaan soo jeedinayaa, in soo jeedimahaygaas oo dhan Miisaaniayda laga hagaajiyo oo lagu daro, WSC.

**Md. Xuseen Axmed Caydiid** **(6min 46sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha, saxaafada iyo marti sharaftaba waan salaamayaa Asc, gudoomiye anigu waxaan doodan ka abaarayaa dhinac ka duwan doodii mudanayaasha oo ah dhinaca sharciga, waxanan aaminsanahay in shirgudoonka iyo xidhibaanada in badaniba anay fikirkaas aan saaka ka hadlayo ay ka tahay wax aan haabkaba inoogu jirin ayaan aaminsanahay, lakiin aragtidaysa shakhsi ahaaneed waan sheegayaa.

Gudoomiye saaka waxaa ina hortaala miisaaniyad waxaanan gudoomiye codsanayaa in waxkhtigayga la isiiyo waayo waxaan ka hadlayaa waa arrin sharci.

**Gudoonka,** Xildhibaan Xuseen Dee Maxkamad maahee meeshuye miisaaniyada ka hadal.

**Md. Xuseen;** Miisaaniyada ayaan ka hadlayaa.

**Gudoonka,** sharciga iska daayoo miisaaniyada ka hadal.

**Md. Xuseen**; Miisaaniyaduba waa sharci inna horyaala, markaa miisaaniyadu waxay waajibinaysaa Cashuur dadka laga qaaday isticmaalkeed iyo qaybinteed iyo sidii hay'adaha loogu kala qoondayn lahaa ayay waajibinaysaa.

Hay'adahaa gacanta ku qabanayaa cashuurtaasi waa in ay noqdaan hay'ado uu sharci jideeyay sida cashuurta qaadisteedaba uu sharci u jideeyay in uma laga qaado, waa in cida maamulaysana uu sharci jideeyaa, waxaynu ka warhaynaa xukuumada maanta dalka ka dhisani badi wasaaradeheedu ee buugaa miisaaniyada inoogu qoran iyo hay'adeheena madaxa banaani badi kuma salaysna Xeerkii nidaamka Xukuumadda Xeer.lr. 71/2015 waxaa lagu saleeyay Digreeto madaxweyne, waayo waxaa jira hay'ado badan oo uu xeerkaasi sheegay oo meesha ka maqan baaba'sana oo aan jiran.

Waxaa kale oo jira qaar badan oo shaqayna oo aan xeerkaas ku aasaasnayn oo aanu xeerkaasi aanu tilmaamayn, waxaa kale oo jira qaarbadan oo magaca ay isticmaalayaan aanu ahay magaca uu xeerku tilmaamay, markaa anigu waxaan is leeyahay hay'ad aan xeerba ku aasaasaysnay aduunka loo dhibaa waxaan is leeyahay sharcigii waxbaa ku jaban taasi waa xukuumada dhexe.

Goleyaasha Deegaanka waxaan ognahay in mudo xileedkoodii dhamaaday, waxaanaynu ognahay in qodob Dastuuriya ama Xeer kale oo jidaynaya ama tilmaamaya inay ama sii fadhiyaan ama ay cidi u kordhin karto mudo xileedkaa xeer tilmaamay ma jiro, waxaa uu Dastuurku si cad u tilmaamayaa oo qodobkiisa 111aad in xog-hayayaasha dawladada hoose iyo madaxda laamaha dawladu ay xilka sii hayn karaan ilaa inta kaga soo dooranayo gole deegaan oo galahan deegaan ee mudo xileedkiisu dhamaanayo badala.

Mudanayaasha ayaa marka aanu meelahaa ku sheekaysanayno waxa uu fikirkoodu yahay xeerka ayay dib u eegi doonaayoo kaas ayaa waajibin doona ayay ku odhanayaan xeerkaasina maanta sharci daro taagana dib kama soo xalaalayn doono qodob dastuuri ah oo yaalana kama hor iman karo.

Waxaa kale oo aan aad ula yaabanahay xog-hayaha dawlada hoose iyo madaxda laamaha kala duwan ee dawlada Madaxweynaha ayaa magacaaba, weyna jiraan oo wey u joogaan waliba waa heer wasaaradeed oo wey ka sii hooseeyaan, halkii ama dadweyne dooranayay ama digreeto madaxweynaba ay ahaan lahayd waabay ka sii hooseeyaan oo waxaa mararka qaarkoodba la duri karaa ama la isweydiin karaa madaxbaanidooda iyo mustaqiladooda ayaaba la isweydiin karaa, markaa anigu ma garanayo sababta uu madaweynu uu u dooranayo iyada oo la heli karo qodobkii uu xeerku tilmaamay, in sharci daro lagu joogo.

Markaa gudoomiye waxaan kaga baxayaa oo aan soo jeedinayaa miisaniyadani maadaamo oo aanay waafaqsanayn xeerkii kala xadaynta xukuumadda iyo xeerkii xeer lr. 71/2015 oo aanay labadaaba midna aanay ku salaysnayn, in miisaaniyadaa la hakiyo inta xukuumaddu ka soo saxayso sharciyada hay'adahaa waanan ka baxay WSC.

**Md. Maxamuud Jaamac Warfaa** **(6min 35sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Shir-gudoonka iyo Mudanayaashaba waan salaamayaa, Run ahaantii miisaaniyada sida loo soo diyaariyay iyo farshaxanimada ka muuqata iyadoo heer kii miisaaniyadaha loo samaynayay ay aad uga muuqato waxaan u mahad naqayaa wasaarida maaliya, waxaa kale oo ay miisaaniyadii hore dheertahay %15, waxaana ay korodhay lacag gaadhaysa 263 bilyan cashuurtaa iyo meesha laga keenayaana ay aad u faah-faahsantahay.

Sida ku cad miisaaniyada waxay sheegaysaa in ay ka imanayso dhawr hay'adood oo kala ah dawlada dhexe oo ay ka imanayso laba tirilyan iyo lix iyo afartan milyan, halka ay hay'adaha madaxa banaan ay ka imanayso lababoq iyo lix iyo afartan bilyan iyo saddex iyo lixdan milyan iyada oo ay dawladaha hoose ay keenayaan saddex boqol iyo lix iyo labaatan bilyan todoba boqol iyo shan iyo afartan, sidoo kale sanduuqa horu marinta Somaliland oo ay ka imanayso todoba iyo afartan bilyan, halka uu baanka aduunku keenayo shan iyo afartan bilayan, iyada oo uu mashruuca JPLG uu keenayo shan iyo toban bilyan iyada oo ay isku gayn noqonayso laba tirilyan, todoba boqol iyo kow iyo konton bilyan, saddex boqol iyo afar milyan.

Runa ahaantii miisaaniyada waxaa ka muuqda mashaariic aad u balaadhan, markaa anigu waxaan soo jeedinayaa laba arimood, maadaama oo ay meesha mashaariic badani ka muuqato, Dastuurkuna ina siinayo in aynu wax ka badelno, waxna ku darno, hadaba iyada oo ay xildhibaanadu ay deegaano ka soo jeedaan waa in mashaariicdan 2020-tiga looga fuliyaa sida ay u kala muhiimsanyihiin.

Miisaaniyadani waxay ahmiyada siinaysaa afar hay'adood oo kala ah wasaarada waxbarashada, wasaarada Caafimaadka, Amniga iyo Biyaha waana afrata meelood ee ay nolosha dadku aad u taabanayso, miisaaniyadu waxaa kale oo sanadka cadaynaysaa in baadhista macdantu ay tahay muhiimad weyn oo ah in dadka loo soo saaro macdan si dhaqaalaha kor loogu qaado.

Waxaa kale oo ay qolada gudidu ay ka dhawaajiyeen oo aana ku taageerayaa in miisaaniyada lagu daro gudidda Arrimaha dibada in ay ka mid noqoto aqoonsi raadinta. Hadii aan ka soo qaato afartaa hay'adood ee ay miisaaniyadu ahmiyada sii say

wasaarada waxbarashada oo kale oo ay ugu jirto in iskuulo badan la dhiso iyo in macalimiin la qoro iyo in la tayeeyo macalimiintaa, sidoo kalana macalimiinta dugsiyada hoose dhexe loo kordhiyo %15 mushaharka.

Waxaa kale oo ay miisaaniyadani jidaysay in cashuuro dheeraad ah la qaado oo loo jeedo in aana cshuuro dheeraad ah la kordhin ee kor loo qaado qiimaha (value), markaa anigu waxaan ku soo koobi lahaa in miisaaniyadan la ansixiyo waad mahadsantihiin.

**Md. Ibraahin Axmed Raygal** **(4min 25sec):-** Gudoomiye Mudanayaasha sharafta leh waad salaamayantihiin waxaan rabaa inaan kaga qayb qaato doodan iyada ah een saddex qodob inaan kaga qayb qaato qodobka kowaad waxa weeye horta xaqiiqdii miisaniyada saa la sheegay waa la soo darsay oo laga soo shaqeeyay Guddideenuna ay iyaguna kasoo shaqeeyeen marka wax badan oo qalin daraysa uma baahna saddexda Qodob ee aan kaga qayb qaadanayaa waxay ka yihiin;

**Qaybta kowaad,** Gudoomiye waxan jecelahay inaan **seketman** uga helo golaha sharafta leh in miisaaniyada halkan ugu qoran ee loogu soo qoondeeyay hay'ad kasta ee qarankeenu leeyahay in **5%** loo wareejiyo ama loogu kordhiyo ciidamada iyo shaqaalaha oo waa in miisaniyada qayb walba laga soo gooyo oo loo **Allocate** gareeyo si noloshooda kor loogu qaado qodobkan waxan doonaya waynu ognahay ciidankeena waynu ognahay shaqaalaheena waynu ognahay noloshoodu Meesha ay marayso markaa waxaynu haysanee inoo hantiyana waa buuga inoogu qoron ee **odoros**kaa waxaynu ka helno markaa in **5%** duco wayn baa ka dhacaysa inaynu u goyno ciidamada iyo shaqaalaha Golahana **seketman** ban ka codsanay Gudoomiye.

**Qaybta labaad,** Sidaa ogtihiin macdanta waa wax inagu cusub oo wadankeena shidaal iyo macdanbaa hada shekadeena ku jirta gaar ahaan xaga macdanta oo meelo badan ka bilaabantay soo saaristeeduba iyo iib ganyteeduba sidaa daradeed halkan waxa ku arkaa lacag **100 bilyan** ah oo la leeyahay ciyaaraha kuna qoron macdanta marka bal ciyaaruhu macdanta haka joogaan.

Halkaa waxan ubadelayaa in laga wareejiyo ciyaaraha loona wareejiyo dadka macdanta ku mashquulsan ee soo saaraya oo aan tababar fiicana aan haysan qalab ay **radioactive** kana iskaga ilaaliyaan ubaahan in halkaa iyadana loo badalo Ayaan iyadana qodobka labaad soo jeedinaya uu yahay waliba aan doonaya in xoog saaarno macdanta sidii looga shqayn lahaa iyadoo hadeerba dad aad ufara badan oo ku mashquulsanaa Gudoomiye dhuxusha gubisteeda ay macdanta ujeesteen oo halkaa ay nolol maalmeedkedii ka heleen markaa in la daryeelo caafimaadkoda, qalabkii iyo tababarkooda in la galiyo Ayaan taana usoo jeedinaya.

**Qaybta saddexaad, Mudane Gudoomiye** intaa wixii ka baxsan madaama miisaniyada laga so shaqeeyay Gudideenu ka so shaqaysay sidaas iyadoo lagu ansixinaayo qodobada ay gudideenu **Outline** garayeeyeen ee in lagu daro ay soo jeediyeen sida Qayb in laga

siiyo golayaasha Baarlamanka dhaqaalaha lagu raadinaayo Horumarinta **Somaliland** iyo xidhiidhka caalamiga Ayaan so jeedinayaa qodabada gudidu ku lifaaqayo, Lifaaqa iyo Guddidu in laysku ansixiyo wa bilahi towfiiq.

**Md. Maxamuud Jamac Cilmi** **(7min sec 01):-** Gudoomiye iyo Mudanayaal aad baan idin salaamayaa,Gudoomiye su'aashaydu waxa weeye waxaan weydiinayaa Gudida dhaqaalaha waxa weeye dowladuhu waxay leeyihiin **Plan** 5 sannadood ay waxa ku qabtaan sannad walba ay wax ku qabtaan markay Ina hortimaado miisaaniyadu wax Plan ah oo si soconaaya hadhowtoolana wax kasoo baxayaan anigu wali maan arag.

Misaaaniyada waxa loo sameeyaa in wixii aad galinaysay ay kaa furtaan markaad **Checkup balance** ay noqoto waxa kusoo baxay iyo waxaad keenayso, markay waxkusoo baxaan unbay lacagtaadu ay qaali garoobaysaa. Markaa aynu wax so saarno waxa yaraanaya wixii dollar iyo lacagtii adkayd ee aynu wax kuso dalbanaynay lacagteenuna korbay u kacaysaa su'aasha kobaad ee aan waydiinayaa Gudida dhaqaalaha waxa weeye;-

**27** sannadood ayaa laynagu kaalmaynaayay **20 malyuun** sannad walba dowaladaha kaalmooyinka bixiya **5400 malyuun** bay noqotay wali miisaaniyada kumaan arag iyadoo halkaa ku cad iyo waxa lagu qabtay midna kumaan arage waa su'aal aan donayo inay ka jawaaban?....

**Gudoonka,** Yaa ka jawaabi Kara….way garan wayeen Ka soco xildhibaan----

Waa su'aal da'weynoo madaxa daalinaysee wax allaale iyo waxay ka shaqeeyan aanay jirin ee uun ay raaali galiyaan Wasaarada **Half abillion** lacag ah ayay ilaa imika la waydiin karri waayay waxa ina soo galay waxa lagu qabtay **30**ilaa**40**kun ayaa mashaariic lagu qorayaa. **20 malyuun** baa sannad walba ina soo gala dowladuhu inagu caawiyaan waa laga jawaabi kaari laayahay waa nasiib darro su'aashaasi waa su'aal ubaahan in dib loogu noqdo lays waydiiyo miisaaniyada Wasaarada maaliyadu waxay ugu soo dari wayday.

**2.** Waxaynu nahay dowlada Islaamkee kaliya misaaniyadeenu uu mukhaadaraad kasoo baxaynu nahay ee qaadku kaso baxda. Qaadka waxa allaale iyo wax inagaga soo noqda waa **500 malyuun** baynu bixinaa waxa kasoo noqdaana ma jiro mashaariicdaa aan idin waydiinayo misaaniyada ayaa so celin lahaa hadii la **Allocate** gareeyo oo loo sameeyo Milixda, Biyaha iyo Kalluunka.

Waagii ay Cadan jirtay ee dowlada ahayd waxay siiyeen Badooda Japan. Misaaniyadooda uga soo bixi jirtay Kalluunka oo ku siyeen oo ay tonbaitor ku qaateen miisaniyada Cadan oo dhami ee Jamhuuriyada ah waxay kala so bixi jirtay Kalluunka iyo milixda inaguna teenu Qaada unbay noqotay aanu lacagteena galino wax aan kasoo baxayn.

Hadaba halkan waxa loo baahan yahay mashaariicda aynu qayb qaybinayno Wasaaradu wixii ay wax ka helaysay soo samaynaysaaye bedelkana inaga sharci u leh sua'ashu waxa weeye maxa Milixda loogu qori waayay inay Wadanka ay **Cover** garayso misaaniyadiisa iyo Kalluunka labaduba walaa Wasaarada walaa inaga walaa Gudida midna muu odhanin mashruucaa haloo qimeeyo haloo qimeeyo **5 malyuun** in kalluun iyo milix lagu soo saaro **100 malyuun** jaarkeenan Ithiopianka ah ayaa u baahan bal waxaynu doonayno inaynu miisaniyada ku helno sow qaad maaha.

Hadaba haday garan wayday wasaaradii iyo Gudideenii waar inagaa xil ina saran yahay aynu milixda udoono miisaaniyadan aynu hayno iyo kalluunkan lacag haloo qoondeeyo kusoo noqoto wadanka waana baahida joogtada ah ee hadii ay wax kugu imaadaan tacliintaada iyo ciidankaaga iyo amnigaaga hadaanad wax u haynin wax allaale iyo wax qabanaysaan ma jirto markaa waxaan soo jeedin lahaa inta waxa kale oo dhan la dhigo si loo sameeyo warshad milixda iyo kalluunka intay dowlad la galno oo aynu u qaybino qayb lacaga aynu ku darsano kamana fakarayno dhaqaale laakin waxaynu ka fakaraynaa qaad aynu soo qaadano iyo mashruuc yar oo aynu **50kun** ku bixino sidan dowlad kuma noqonayno hadaanaynu lahaanin dhaqaale asaasiya oo mujtamacani uu leeyahay Sidaa awaawadeed waxaan so jeedinayaa in misaaniyada aynu iskugu gayno manta **5 malyuun** milix ku sameeyo oo sibidhkii la sameeyo anagaaba warshado hayna **130 malyuun** Ayaan uhayaa imikadaa aan idinla hadlayo laakin ragbaa isku duuduubay shirkadii waa diyaar wax walba way soo qortay laakin siyaasad daradeed bay rag isku duudubeen bal markaa sibidhku ha inooba danbeeyo ragbaa qaatee waxaan usoo jeedinayaa in Milixda aynu halkaa uqaybino manta **100 malyuun** ee Ithiopianka ah iyo kalluunka si aynu wax igu soo saari lahayn.

**Marwo. Baar Siciid Faarax** **(15min 34sec):-** Bismilahi Raxmaani Raxiim. Waxaan salaamayaa Golaha. Miisaaniyaddan waxaan ka bilaabayaa 2% Gobolada barrio o Guddidu soo jeedisay in 33 mashruuc laga fuliyey. Guddidu waxay noo sheegtay sida ku cad qoraalkeeda in aanay tagin Gobolka Sanaag. Waxay sheegeen in 33 mashruuc la fuliyey oo aanay haddana qoraalka ku soo darin oo wax la taaban karro oo tilmaam ah kumay soo darin.

Anagu haddaan nahay dadka ka soo jeedaa Gobolada Barri ma hayno 33 mashruuc, ninka cadaynaya ee qoraal ku hayaan ha keeno. Guddida waxay keentay war aan la hubin oo Gobolkiiba may tagin oo Sanaagna may tagin Sool may tagin.

Waxaan rabnaa in la cadeeyo 33 mashruuc oo sidaan sheegay Miisaaniyaddii hore dad ayaa bixiya cashuurtaas oo ha la cadeeyo ama waa in dadka culayska laga daayaa bixiya. Ta labaad waxay soo sheegeen ururka naafada, sida aan ognahay naafadu way fara badan tahay ama kuwo ha ahaadaan dagaaladii ku naafoobay ama kuwo cudur ku naafoobay ahaadaan ama kuwo gaadhi la dhacay ha ahaadaan, waxa jira urur badan oo

naafo ah, markaa sabab aynu u kala dhawaysanaa ma jirto, waxaan leeyahay waa in Miisaaniyadda loo kordhiyaa loona qaybiyaa.

Miisaaniyadda Wasaarada beeraha waxa ku jira hoos u dhac, wax loo kordhiyo iska daaye waxbaa laga jaray. Waa wax lala yaabo Wasaaradii Beeraha oo aynu doonayn in ay wax soo saarka kordhiso mi miisaaniyadeeda la jaro. Haddii la saluugu hawsha Wasaarada, Xukumada ayey u taalaa siday hawsha wasaarada u socodsiinayso, laakiin Wasaarada Beeraha Waxaan soo jeedinayaa in Miisaniyadda loo kordhiyo.

Waxaan sheegayaa meelaha lacagaha looga kordhinaayo, waxa kale oo aan soo jeedinayaa in Ciidamada kala duwan $80 ayuu qaataa ninka askariga ahi, habeen iyo maalin ayey soo jeedaan, inaga oo hurudna ayey tuugta inaga ilaaliyaan, waa kuwa ina hortaagan ee imika inaga ilaalinaya cadawga. Ciidamada ha loo kordhiyo lacagta dhammaantood, arrinkaas ha loo fiirsado, haddaan loo fiirsan oo aan ciidanka mushaharka loo kordhin, waxaan soo jeedinayaa in ciidanka mushaharka loo kordhiyo 30%. Wuxuu noqon doonaa wax gondaheena iman doona, Ciidmada, Ciidamada, Ciidamad ha loo kordhiyo mushaharka ayaan soo jeedinayaa.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in Shaqaalaha mushaharka loo kordhiyo oo ay ku jiraa kuwa Golaha Wakiiladu. Aniga waxa iga hadlinaya wax badan ayaa ogahay oo Hooyo ayaan ahay, waxa laga yaabaa in Ragu sidaan warka u hayo aanay u ahayn, culus badan ayaa dadka haysta, waxaan soo jeedinayaa in shaqaalaha Mushaharka loo kordhiyey.

Haddii roob yari da'o, waad ogtihiin dhiiqada iyo Biyaha socda, gaadhigu wuxuu is odhanayaa ka leexo godka, wuxuu jiidhayaa Geed ama Guri, waxaad ogtihiin waxa shil dhacaya waa in wax laga qabtaa oo Miisaaniyad wacan looga qoondeeyo Miisaaniyadda Qaranka.

Gawaadhida marka la soo dejiyo waxa laga qaadaa cashuur badan, waxa laga qaadaa kala wareejin, waxa laga qaadaa liisan, waxa laga qaadaa Buug, waxa laga qaadaa waddo maris. Waar inta Gaadiidka laga qaado ayaa wadooyinka ku filane hadayna wax kale ku darayn intaa maa loo ururiyo Wadooyinbka. Waxaan leeyahay ha la baraarugo oo waddanka ha loo soo jeedsado, waxay illa tahay in aanay cid kale u maqnayn inaga xil ayaa ina saaran. Markaa wasaarada gaadiidka ha lagu darro in jidadka la hagaajiyo. Mida labaad Miisaniyad ayaa la soo jeediyaa in wax lagu darro ama xukumadu si u qoondaysaa. Markaa mashruuca ku jira Miisaaniyadda waa in la dabagalaa oo Guddida Golaha Wakiilada uga wakiil ah mashruucii ileen Buugii ayey haysaan, lifaaqii ayey haystaan, waa in ay ogaadaan mashruucii siduu u fulay ma fulay mise ma fulin.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in kasta oo aan doorasho arkayn, hadana madaxweynuhu waxa uu soo jeediyey in kooto dumarka loo sameeyo, haddana xeerka waxa ku jira in qofkii isa sharaxa 50,000 SL.SH laga qaado, waxaan is leeyahay arrinkaas

dumarka ayaa loola dan leeyahay awalba ma dhici jirin. Haddii doorasho qabsoomayso Miisaaniyadda ha lagu darro dumarka sharaxan.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa Madaarada Burco, Ceerigaabo iyo Laascaanood madaaradaasi way xidhan yihiin muddo sagaal sanadood ah, sabab ay u xidhan yihiin ma garanayno. Madaaradaas miisaaniyadda ha loogu darro lacag hana la furo. Dadka dhibaataa haysata qof halkan jooga ayaa la odhanayaa Hooyada ayaa dhimatay ama inaga mid ah ama xildhibaan ayaa u baahanaya ama qof ayaa xanuusanaya jidka ayuu ku soo dhimanayaa isaga oo gaadhi lagu sido, dumarkii foolanayey ayaa jidka ku soo dhimanaya Madaaradaas saddexaas Gobol miisaaniyada ha looga qoondeeyo ayaan leeyahay.

Waxa halkan ku qoran cashuurta sibidhka inaga soo galaya, iyada oo ay warshadeenii fadhido oo lagaba yaabo in wax yari ka maqan yihiin. Waxaan soo jeedinayaa in warshadeena Berbera la kiciyo. Waa in miisaaniyadda lagu daraa haddii aanay xukumadu awood u lahayn waa in la siiyaa cidii reer Somaliland ah ee awoodi karta oo laga maarmo sibidhka dibedda ka imanaya waa in la kiciyaa warshadas waa muhiim.

Dalka waxa ku socda mukhaadiraad, qaad ayaa ka mid ah, Daroogada ayaa ka mid ah oo had iyo jeer ciidanku qabtaan, waa in sharciga iyo Ciidanka la xoojiyaa oo dhibta laga ilaashaa carruurta iyo hooyooyinka dhalay. Meelaha lacagta laga jarayo waxa ka mid ah Golaha Wakiilada, Golaha Guurtida, Wasaarada Warfaafinta, Xafiiska Madaxtooyada, Wasaarada Maaliyadda oo shan Wasaaradood la miisaaniyad ah 23%. Wasaarada Maaliyadda sanadkan kordhorkeedu waa 40,000,000 SL.SH caqliga ma gasho.

Banka adduunka caawimadooda, doorashada lamo qabto haddana sanad kasta way ku jirtaa, Iib idaacadeed oo sanad kasta ku jirta. Idaacad la iibiyey iyo idaacad shaqaysa toona ma ahayno. Ha lagu daro meelaha looga baahan yahay lacagta.

Mashruuca JPLG oo in faro badan shaqaynayey Gobolada Barriga waa ka xaaraansan yahay Madaxweyne ku xigeenkaana Maamula. Waa in mashruuca JPLG la geeyaa Gobolada Barriga, haddii kale waa in la cadeeyaa in Goboladaasi Somaliland ka mid ahayn. Waxaan soo jeedinayaa Guddoomiye aniga oo aan wax xumaan ah uga jeedin, maadaama oo aanay Gobolada Gaadhin, Maadaama oo ay in badan shaqaynayeen, maadama oo ay Wasaaradii isku milmeen. Waxaan soo jeedinayaa in la bedelo.

**Md Saleban Diiriye Barre** **(4min 30sec):-** Suma wasalaatu Wasaalamu Calaa Nabiyu Salalahu Calayhi Wasalam. Shir-guddoonka, Mudanayaasha, dadweynaha, Saaxafada madaxa banaan iyo Kuwa dawliga ah, waxaan idinku salaamayaa Asalaamu Calaykum Waraxmatulaahi Wa Barakaatu.

Mudanayaal, marka la eego Miisaniyada horteena taala ee Qaranka, marka la eego qaabka ay u samaysan tahay iyo sida loo waxeeyey. Aniga oo ka duulaya saddex

miisaaniyadood ee ka horeeyey oo saddedaba arkay, waxaan odhan karaa waa tii ugu saxsanayd ama ugu faahfaahsanayd miisaaniyadahaas.

Amaan ayey ku ku mudan yihiin Wasiirka iyo Hawladeena Wasaarada ee iyaguna soo diyaariyey. Taas macnaheedu maaha in 100% miisaaniyadu ay sax tahay, way jiraan meel badan oo wax ku jiraan oo u baahan in dib loo eego, wuu jiraa oo wuu ka muuqdaa korodh badan oo miisaaniyada ah, maadaama oo korodh badan ku jiro way muuqataa in qaabka loo qoondeeyey aanu sax ahayn oo ahayd in laga dhigo kuwa ugu mudan maanta.

Kuwa ugu mudan oo ay ahayd in wax loogu daro waxay Ciidanka oo ah ku soo ururinaya isla markaana masuuliyadi ka saaran tahay, waa kuwa habeen iyo maalinba u soo jeeda dadka, dalkan iyo Qarankan. Waxa weeyaan kuwa ugu mudan oo waliba la hubiyo oo miisaaniyada loo kordhiyo.

Waxaan soo jeedinayaa marka laga yimaado Ciidanka, waxa jira Wasaarado ay mudan tahay in Miisaaniyadooda la kordhiyo. Wasaaradaha aan is leeyahay miisaaniyadooda ha la kordhiyo waxa ka mid ah; Wasaarada Beeraha, Wasaarada Xanaanada Xoolaha iyo Kalluumaysiga oo wax wasaarada wax soo saarka dalkeena iyo Wasaarada Tamarta iyo Macdanta oo wax badan qabatay si la markaana la rabo inay wax soo saaraan oo sahamiyaan Macdeenta dalka ku jirta.

Waa miisaaniyaddii kaliya ee aan arko ee Goboladaas barri ay wax ugu jiraan, in kasta oo ay ahayd in waliba loo kordhiyo oo la libin laabo oo aanay ku filnayn. Waxay in goor hore la tilmaamo oo loo qoondeeyo sida loo qaybsanyo miisaaniyada.

Waxaan soo jeedinayaa inay tahay Miisaniyadani tahay Miisaaniyadii ugu haboonayd oo ay tahay in kasta oo ay iska daalaa dhacayso, halkaas iyo meel ka wanaagsana aan u rajanaynayo. Waxaan u soo jeedin lahaa xildhibaanada in aynu ansixino oo siidayno.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ______________________ | ______________________ |